Victims Information

# Dhibanyaasha xad gudubka galmada

## DHEX SOCDA NIDAAMKA CADAALADA DENBIILAHA WAXA DHACO IYO SIDA LOO HELO TAAGEERADA

Xad gudubka galmada waa denbi aad halis u ah. Waxyeeladu waxay noqon kartaa mid xanuun leh oo muddo dheer socota. Qof kastaa waxaa uu uga jawaabaa si kala duwan, waxaynau baahan tahay nooco kala duwan oo taageero ah.

Haddii aad warbixin ka soo bixiso iyo hadaadan ka soo bixinba denbiga, waxaad heli kartaa taageero. Waxaa jira hay'ado aagaada ah oo ku siin karo khabiirka dareenka iyo taageero wax ku ool ah. Soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaato hay'adaha kuu dhaw. Warqaddan xogtu waxay sharaxeysaa waxa dhacayo haddii aad ka warbixiso dambiga iyo taageerada aad heli kartid.

*Fadlan eeg dhammaadka warqaddan xogta ah ee xiriirada ugu muhiimsan ah iyo qaamuuska.*

### Xuquuqda dhibanaha

Waxaad xaq uleedahay in laguu sheego adeegyada ku caawin karo, in la joogteeyo wargelinta horumarka dacwada ilaa maxkamadda iyo in aad ogaatid waxa la filanayo goortii aad maxkamadda aadid.

Waxaad xaq u leedahay in aad u sheegtid maxkamadda sida dambiga uu kuu saameeyay. Hadii aad tahay dhibanaha dambiga qofka yar, waxaad xaq u leedahay in aad ka soo qeybgashid shirka kooxda qoyska iyo in aad dhahdid waxa aad jeclaan laheyd in aad aragtid in ay dhacaan.

Xaaladaha qaar, adiga ama wakiilkaaga wuxuu xaq uleeyahay in uu hadal ka dhaho waxyaabaha sida magaca xakameynta, damaanada, xabsiga guriga ama cafiska.

Waxaad ka filan kartaa edeb, naxariis iyo adeegyo ixtiraam leh saraakiisha maxkamadda, booliska iyo qof walboo kale oo kulug leh dacwada. Waxaad xaq u leedaahay arimaha gaarka ah.

Akhri Xeerka Dhibanaha oo warbixinta dheeraadka ah ee ku saabsan xaquuqdaada iyo daaweynta aad fillan kartid. Waxay ku jirtaa websaydkeena ee victimsinfo.govt.nz oo ay weheliso xog kale oo waxtar leh.

Haddii aad u maleysay in aan xaquuqdaada la buuxin, ama aadan helin heerka adeegyada aad filaneysid, waxaad sameyn kartaa cabasho. Booqo victimsinfo.govt.nz ama soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654.

### Wargelinta denbiga

Haddii aad aheyd hadeer dhibane xadgudubka galmada ah, ama aad dareemaysid bilaa amni, soo wac 111 oo dalbo boolis.

Haddii uu denbigu dhacay waqti hore, xataa sannado ka hor, weli waad wargelin kartaa. Majiro waqti u go'an xilliga aad warbixin denbiga xad gudubka galmada aad ka siin karto bilayska. Haddii aad ku go'aansato inaad wargeliso denbi dhacay waqti hore, lahadal rugta booliska aagaaga oo codso inaad la hadasho denbi baare. Waxaad soo kaxaysan kartaa qof taageero ah markaad soo wargelineysid denbi.

Mudnaanta koowaad ee booliska waa in uu hubiyo in aad badqabto. Isla markaad warbixin ka bixiso denbiga waxaa laguu xil saari doonaa sarkaal boolis oo ka noqon doono masuuul dacwadaada. Waad la xiriiri kartaa iyaga waqti kasta si aad u ogaato waxaa dhacaya.

Booliska sidoo kale wuxuu wacayaa qof takhasus leh ee hay'ada waxqabadka dhibaatooyin gaar ah ama Taageerada Dhibanaha oo kaala hadlayo waxa dhaco kadib. Qofka takhasuska leh ee hay'ada waxqabadka dhibaatooyinka waxaa si gaar ah loogu tababaray si uu u taageerodhibanayaasha xadgududbka galmada iyo way kula shaqeyn karaan ilaa baaritaanka iyo dacwada maxkamadda.

Waxaad soo wici kartaa Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaatid hay'ada taageerada kale ee aagaada.

## Baaritaanka

Baaritaanka denbiga xadgudubka galmada waa hawl xoog saarid deg deg leh iyo booliska wuxuu isku dayayaa iyo in uu usu keeno inta badan oo caddeynta suurtagalka u ah dacwada. Werayste si gaara loo tababaray oo ka socda booliska ayaa kula hadli doona, wuxuu ku waydiinayaa inuu kula hadlo dhawr jeer si aad u ogaato wax kasta oo dhacay. Waxaad weydiin kartaa in aad la hadashid sarkaal dumar ama rag boolis ah.

Ka qayb ahaan baaritaanka, waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagu waydiiyo inaad marto baaritaan caafimaad. Tani waa ikhtiyaarkaaga. Waxaad la kulmi doontaa dhakhtar si gaara loogu tababaray la shaqaynta dadka la kulmay dhibaabtooyinka xad gudubka galmada. Tani waxay bixinaysaa caddayn faa'ido u leh dacwada. Waxaa kula joogi doona qofka ku taageero waqtiyada inta badan.

Xiliga lagu jiro baaritaanka, booliska waxaa laga yaabaa in uu wareysto qof walba oo kasta oo wax ka yaqaano wax ku saabsan dambiga, sidoo kale sida isukeenida caddeynta sida sawirada iyo baaritaanka dembiyeed. Haddii uu booliiska helo caddeyn ku filan, waxay samaynayaan xarig waxayna ku soo ogayaan qofka xadgudubka dembiga sameeyay.

#### DAMAANADA

Marka la xiro qof, waxaa laga yaabaa in la sii daayo ilaa ay maxkamadda ka aadaan. Tan waxaa lagu magacaabaa -damiin. Mararka qaar waxaa jiro xaalado ku saabsan halka qof uu ku noolaanayo iyo laga yaabo in ay qabaan bandow. Haddii booliska u maleeyo in adiga ama dad kale oo bulshadda ka mid ah ay halis ku jiraan, qofka laga yaabo in xabsi lagu hayo ilaa ay maxkamada ka yimaadaan, marka ay codsan karaan damiin mar labaad ah.

Waxaad dooran kartaa in aad aragtidaada ka dhiibato ee ku aadan ku siideynta qofka damaanada oo lagaala taliyo natiijada. Waxaad sidoo kale dooran kartaa in aad qeyb ka noqotid diiwaanka waregilinta dhibaha si markaas laguula soo socodsiiyo waxa ku dhaco dambiilaha markii la xukumo ka dib. Faahfaahintaadu way dhawrsanaan doontaa. Waxaad dooran kartaa qof in uu kuu qabto xogtaan, haddii aad jeceshahay.

#### WARBIXINTA SAAMAYNTA DHIBANAHA

Waxaa lagu weydiinayaa haddii aad rabtid inaad samayso warbixinta saameeynta dhibanaha. Tani waxay maxkamadda u sheegeysaa sida dambiga uu kuu saameeyay. Sarkaalka booliska ee ka masuulka ah, Taageerada Dhibanaha ama hay'ada taageerada ayaa kaa caawin karta qoraalka warbixintaan. Arag wax badan oo ku saabsan warbixintaada saameynta dhibanaha sida waafaqsan *go'aanka maxkamadda iyo xukunka*.

Mararka qaarkood, dhib ma leh sida uu u dhammaystiranyahay baaritaanka, ma jirto baariitaan ku filan oo lagu xiri karo ama dacwada maxkamad loogu qaado. Tan macnaheedu maaha in aan lagu rumaysan.

## Taageerada

Waxaad heli kartaa taageerada marka dacwadaada la baaraayo. Si loo helo taageero laab la kaca, ama taageero arrimaha dhabta ah (sida ogaanshiyaha caymiska), kala xiriir Taageerada Dhibanaha 0800 842 846 ama ka wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 si aad u ogaato hay'adaha taageerada kale ee aagaada.

#### DENBIYADA DHALINYARADA

Haddii denbiga uu sameeyo qof ka yar 17 sanno jir arrinka waxaa loola tacaalayaa iyadoo la raacayo nidaamka cadaalada dhalinyarada. Dhibanayaasha waa qeyb weyn oo muhiim u ah nidaamka cadaalada dhalinyarada oo waxaad leedahay xaqa aad uga soo qeybgashid shirka kooxda qoyska.

illo kala duwan ayaa laga heli karaa Canuga, Dhalinyarada iyo Qoyska (CYF) iyo maxkamaddaha oo ku saabsan nidaamka cadaalada dhalinyarada. Isu duwaha kooxda qoyska ee ka yimid CYF ayaa kula soo xiriiraya.

#### TAAGEERO LACAGEED

Deeqaha dhaqaalo waxaa loo heli karaa in ay kugu caawiyaan in ay kaa daaboolaan qaar ka mid ah qarashka la xiriiro dambiga. Si aad u hubisid haddii aad heli kartid deeqda, iyo si aad u ogaatid sida loo codsado, kala xiriir Taageerada Dhibanaha 0800 842 846.

- Deeq oo ilaa $500 ayaa loo sheegan karaa qarashaadka sababay xadgudubka galmada, sida sameynta qufulada, beddelka dharka, ama hoy kumeel gaar ah.

- Maalgelin $100 maalintii ah ($50 maalintii barkeeda) waxaa loo heli karaa dhibanayaasha xadgudubka galmada iyo taageeradooda oo qofka aan la mushaarin in uu ka qeybgalo dacwadaha maxkamada. Deeqdaan waxaa sidoo kale laga heli karaa daryeel bixiyaha imanaya maxkamadda isagoo metelaya canuga dhibanaha ah, iyo qofkooda taageerka.
- Taageerada dhaqaalaha waxaa loo heli karaa safar, hoy iyo adeegyada la xiriira dhibanayaasha dambiga halista ah (oo ay ku jirto dhammaan dambiyada galmada) iyo taageeradooda qofka aan la mushaarin ee imanaya maxkamadda iyo dhageysiyada Guddiga Cafiska.
- Ilaa $2000 ayaa loo heli karaa sida meesha ugu dambeysa ee arrimaha degdega oo dadka uqalma kaarka adeegyada bulshada.

Waxaad sidoo kale awood u yeelanaysaa in aad ka heshid taageero dhaqaale ACC. Waydii wakaaladaada taageerada si aad u ogaatid waxa badan, ama wac ACC Khadka-caawinta Cabashada Xasaasiga 0800 735 566.

## Maxkamadda

Eedeysanaha (qofka dambiga lagu soo eedeeyay) waxaa laga yaabaa in uu Maxkamadda ka hor yimaado dhawr jeer, tusaale ahaan in uu qirto in uu yahay denbiile ama mid aan denbi qabin ama in garsoorahauu eego caddaynta dacwada. Suurtogal maaha inaad timaado dhegaysiyada oo dhan, laakiin waad tagi kartaa haddii aad jeceshahay.

Haddii eedeysanaha uu qirto dambiga, maalintaas ayaa la xukumayaa, ama taariikhda ama taariikh ayaa loo diyaarinayaa oo dhageysiga xukunka ah. Haddii qofka uusan qirinin dambiga, dacwada waxay aadeysaa maxkamad.

Maxkamadda, dacwad ooge ayaa usoo jeedin doona dacwada garsooraha iyo xeer-beegtiga. Dacwad oogaha u shaqeeya dawlada ayaa ka masuula xeer ilaalint dacwadaha isa goo ku metalaya Xeer -ilaaliyaha gobolka, booliska iyo dadweynaha. Waxay u dhawdahay in laguugu yeero in aad markhaati u noqotid Dacwad oogaha si aad ugu caawisid caddeynta dacwada ka soo horjeeda eedeysanaha (fiiri *Marqaati noqoshada*).

Dacwad oogaha ayaa kula kulmayo iyo kuu sheegayo waxa ay yihiin dacwadaha la soo oogay iyo sababtee, iyo maxay kula tahay in ay maxkamadda ka dhacdo.

Xaaladaha xad gudubka galmada. awgeed, saxaafadu gabi ahaanba waa ka mannuuc in ay ka sheegaan magacaaga ama wax kasta oo tafaasiila oo laga yaabo inay ku muujiyaan.

U sheeg la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada, sarkaalka booliska ah ee u xilsaaran dacwadaada ama shaqaalaha taageeradaada gaarka ah haddii aad u baahantahay dhageysi, dhaqdhaqaaqa ama caawinta turjumida luuqada.

Amnigaagu waa muhiim Haddii waqti walba aad ka walaacsantahay amnigaada maxkamadda ah, la hadal sarkaal booliska ama sarkaalka amniga.

### LA TALIYAHA DHIBANAHA XADGUDUBKA GALMADA

Dhibanayaasha xadgudubka galmada waxay heli karaan la taliyaha takhasuska dhibanaha kaas oo u tababaran iyo waayo aragnimo u leh ka shaqeynta xadgudubyada galmada.

La taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ayaa sharaxayo nidaamka maxakamdda, si uu kaaga caawiyo inaad fahamto waxa dhacaya iyo goorta, waxayna kuu sheegi doonaan xilliga uu xad gudbuhu uu iman doono maxkamadda. Sidoo kale waxay kaa caawin doonaan inaad hesho taageero gaara oo kugu haboon.

Soo wac Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha 0800 650 654 wixii warbixin dheeraad ah.

## Marqaati noqoshada

Waxaa suurtogala in laguugu yeero markhaati ahaan. In markhaati lanoqdo waxay noqon kartaa waayo aragnimo walbahaar badan. Dacwad oogaha, sarkaalka booliska eeu xilsaaran iyo la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada wuxuu kuu sheegi karaa waxa ku lug leh iyo waxa la filanayo.

### MAXKAMADDA KA HOR

Sarkaalka booliska ee u xilsaaran ama la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ayaa kuu sheegayo goorta iyo meesha aad u baahantahay in aad ka joogto maxkamadda. Sidoo kale waxaad heli doontaa ogaysiis rasmiya oo laguugu keeno guriga.

Dacwad oogaha ayaa kaala hadlayo waxa aad u baahntahay in aad sameyso markhaati ahaan. Waxaad codsan kartaa inaad booqato qolka dhegaysiga dacwada waqtiga kahor. La hadal la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada, sarkaal ka u xilsaaran ama shaqaalaha taageerada si uu tan u diyaariyo.

La hadal la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ama sarkaalka u xilsaaran hadii aad rabtid in aad abaabusho:

- qof kugula kulmo maxkamadda ama bannaanka maxkamadda
- qof taageere leh oo kula fariisto goortii aad caddeynta dhiibeysid
- shaashad ama telefishin ay ku xidhantantahay kamarada guriga lagu ilaaliyo, si markaas aadan u eegin eedeysanaha goorta aad dhiibeysid caddeynta (hadii la heli karo).

#### MAXKAMADDA

Markaad bixineyso caddaynta, maxkamaddu waxay noqon doontaa maxkamad "albaabadu u xiran yihiin". Tani macnaheedu waa xubnaha dadweynuhu ma joogi karaan halkaas. Waxaa lagu waydiin doonaa su'aalo ku saabsan waxa dhacay ama waxaad ka og tahay denbiga.

Maxakamaddaha badankoodu waxay leeyihiin goobaha sugitaanka dadka loogu talo galay ee loogu yeeray markhaati ahaan, laakiin waxay u dhawdahay inaad weli arki doontid qoyska eedaysanaha iyo saaxiibada ku dhex jira ama hareeraha maxkamadda.

Waa muhiim inaad hesho taageero marka aad tahay markhaati, labadoodaba kahor iyo maalintaba. La hadal lataliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ama shaqaalaha taageerida ku saabsan helida taageerada adiga kuugu habboon.

## Go'aanka maxkamadda iyo xukunka

Dhammaadkka maxkamadda, eedeysanaha waxaa lagu helayaa dambi ama dambi la'aan. Dacwadaha qaarkood, sida meesha xeer beegtida aysan go'aan gaarin, waxaa laga yaaba inay jirto dacwad kale.

Haddii eedeysanaha aan lagu helin dambi, micnaheeda ma ahan in aan lagu aaminin. Dacwadaha waa arrimo sharci iyo caddayn. Mar hadiiba eedeysanaha aan lagu helin dambi, way fasaxanyihiin in ay baxaan. Tani waxay kugu noqon kartaa lama filaan oo waxaad dooni doontaa inaad kala hadashid arintaan la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ama shaqaalaha taageerada.

Haddii eedeysanaha lagu helo dambi, waxaa laga yaabaa in la xukumo maalinta ama taariikhda ama taariikh ayaa loo diyaarinayaa oo dhageysiga xukunka ah.

#### CADAALADA HESHIISIINTA

Shirka cadaalad heshiisiinta waa kulan hawl fududeyn aan rasmi aheyn oo u dhaxeeyo dhibanaha, dambiilaha, dadka taageera, iyo dadkale oo la ogolaaday, sida wakiilada bulshadda ama turjubaanada.

Cadaalada heshiisiintu waxay u suurtogelisaa dhibanayaasha in ay u sheegaan dambiilaha sida ay u saameysay, hadal ka jeedi oo sida loo xalin lahaa waxyeelada, iyo bilow in aad xalisid saameynta dambiga.

Si dacwadaada loogu tixgeliyo cadaalada heshiisiinta dambiilaha waa in lagu helaa dambi ama uu qirtaa dambiga xadgudubka ah, oo labadiinuba waa in aad diyaar u ahaataan in aad ka qeyb qaadataan.

Haddii aad rabtiid in aad ogaatid wax badan oo ku saabsan cadaalada heshiisiinta weydii la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ama booqo justice.govt.nz/restorative-justice

#### XUKUMIDA

Garsooraha waxaa sharci ahaan laga rabaa in uu tixgeliyo arrimo badan, sida xukunkee la siiyay oo dambiga kale la mid ah iyo warbixinaha ku saabsan dambiilaha.

Haddii uu garsooraha aqbalo, (ama qof kale aad dooratay) ayaa kuu akrin kara dhammaan ama qayb ka mid ah warbixinta saamaynta dhibanaha maxkamadda ee dhageysiga xukumida. Weydii la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ama sarkaalka booliska u xilsaaran dacwadaada in uu kuu weydiiyo garsooraha. Garsooraha waxaa laga rabaa in uu tixgeliyo warbixintaada saameynta dhibanaha marka la xukumayo dambiilaha.

#### MAGDHAWGA

Mararka qaar garsooraha wuxuu ku amrayaa dambiilaha in uu lacag ku siiyo, oo layiraahdo magdhaw, hadii dhaawac uu ku gaaray ama hantidaada ay luntay ama la waxyeeleeyay iyaddoo sababtu tahay dambiga. Waxaad ka soo wici kartaa maxkamada 0800 909 909 si aad u diyaarsatid habka ugu wanaagsan ee aad ku heleysid magdhawgaada.

#### RAFCAANADA

Labaduba dacwad oogaha iyo xad gudbuhuba waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ka qaataan go'aanka maxkmaddeed iyo xukunka. Tan macmaheedu waxaa weeye maxkamadda sare ayaa eegi doonta dacwada markale. Haddii tani ay dhacdo, dacwad oogaha ayaa kula socodsiinaya nidaamka.

## Maxkamadda kadib

Marka lagu helo dambi, eedeysanaha waa la xukumayaa. Fahamka xukunku maaha mid inta badan sahlan. Sarkaalka booliska u xilsaaran dacwadaada ama la taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada ayaa sharaxi karo waxa ay tahay xukumida.

### KA SIIDEYNTA XABSIGA

Dambiilayaasha waxaa looga soo daayaa maxkamadda midkood cafis ama marka uu xukunkooda dhammaado. Tani waxay noqon kartaa mid ka horeysa inta aad filaneysid, sababtoo ah waqtiga ay ku qaateen xabsiga inta aan dembiga lagu helin ka hor iyo xukunka waxaa loo xisaabinayaa sida qeyb ka ah xukunkooda.

Hadii xukunka dambiilaha dhammaado, waa in laga soo daayaa xabsiga. Laguma hayn karo xabsiga xukunkooda markuu dhammaado kadib.

Dambiile waxaa laga soo deyn karaa xabsiga inta aysan dhammaanin xukunkooda haddii cafis la siiyo. Guddiga Cafiska New Zealand ayaa eegayo dacwada dambiilayaasha badankooda oo go'aaminaya haddii siideynta hore ee dambiilaha ay u keeneyso haliso aan cudur daar lahayn amniga bulshadda.

Dambiilayaashu badanaaba waa in ay buuxiyaan shuruudo gaar ah ugu yaraan lixda bilood ee ugu horeysa ah markii lagu siidaayo cafis kadib. Shuruudahan waxaa gooya Guddiga Cafiska ama garsooraha xukumay dambiilaha. Shuruudahan waxay dabooli kartaa meesha ay ku noolaan karaan, qofka ay la xiriiri karaan, hadii ay qabaan bandow, iyo arimo kale oo laga yaabo in ay caawiso badbaadada bulshada.

### WAXAAD U SHEEGI KARTAA GUDDIGA CAFISKA SIDA AAD U DAREENTAY SIIDEYNTA DAMBIILAHA

Si aad hadal uga jeedisid siideynta hore dambiilaha xabsiga, waxaad u baahantahay in aad ka diiwaan gashanaatid diiwaanka ogeysiinta dhibanaha si markaas Guddiga Cafiska uu kuula soo xiriiro mar kasta oo dambiilahu uu helayo dhageysiga Guddiga Cafiska ah.

Si aad u hubisid faahfaahinta xiriirka ay ku cusubtahay diiwaanka, la xiriir booliska, Waaxda Asluubta ama hay'ada taageerkaada.

Waxaad u sheegi kartaa Guddiga Cafiska sida aad dareentay oo qoraal ahaan ah, shirka fiidiyowga ama qof ahaan:

- **Qoraal ahaan ama shirka fiidiyowga.**
  La hadal xiriirka Guddiga Cafiskaada.
- **Qof ahaan ah.**
  Guddiga Cafiska ayaa kula kulmaya. Waxaad lahadleysaa dad la mid kuwa arki doona dambiilaha, laakin dhageysiga aad ka qeyb gashay ma noqoneysa xabsi oo dambiilaha meesha ma joogayo. Waxaa kula joogi doona dad taageerayaal ah marka dhageysiga.

## Xiriirada muhiimka ah

Waxaa jira taageero laguu heli karayo xaalad kastoo aad ku jirto nidaamka cadaalada denbiilaha, iyo taageero gaara si lagaaga caawsiyo sidii aad ula tacaali laheyd saamaynta denbiga.

Halkaan waa faahfaahinta xiriirka adeegyada muhiinka ah qaarkood ee dhibanayaasha iyo dadka dambiyadu ay saameeyeen. Waxaad ka heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha ee 0800 650 654 (9am ilaa 6pm ka bilow Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo booqanayo victimsinfo.govt.nz

**ACC**
acc.co.nz
0800 735 566 Khadka-caawinta Cabashada Xasaasiga (dhibanayaasha xadgudubka galmada)

**Waaxda Asluubta**
04 460 3000
corrections.govt.nz

**Guddiga Cafiska New Zealand**
0800 PAROLE (727 653)
paroleboard.govt.nz

**Taageerada Gaarka ah**
Eeg victimsinfo.govt.nz ama qeybta adeegyada caawinta gaarka ah ee buugga teleefonka

**Booliska**
Waxaad ka heli kartaa saldhiga booliska deegaanka police.govt.nz ama boggaga baluuga ah ee bilowga buugga telefoonada

**La taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada & La taliyaha dhibanaha maxkamadda**
0800 650 654 Khadka Macluuumaakda Dhibanayaasha

**Taageerada Dhibanaha**
0800 VICTIM (842 846) 24 saacadood maalintiiba
victimsupport.org.nz

**Hoyga Qaxootiga Dumarka**
0800 REFUGE (733 843) 24 saacadood maalintiiba
womensrefuge.org.nz

**Khadka luuqada** adeegyada turjumaada
0800 656 656
9am–6pm Isniin–Jimco, 9am–2pm Sabti

---

## Qaamuuska

**Damaanada**
Marka booliis uu siidaayo qof lagu soo eedeeyay dambi oo xaalada ay aadeen maxkamada.

**Eedeysanaha**
Qofka lagu soo eedeeyay dambiga.

**Dilka**
Marka qof uu dilo qof kale.

**Dambiilaha**
Qofka lagu xukumay dambiga (Inta aan lagu helin dambiga, qofka lagu soo eedeeyay dambiga waxaa la dhahaa 'eedaysane').

**Cafiska**
Marka dambiile loo ogolaado ka bixitaanka xabsiga si loogu dhameeyo xukunkooda gudaha bulshadda. Waa in ay raacaan sharuudaha gaarka ah.

**Cadaalada heshiisiinta**
Cadaalad heshiisiinta waxay u ogolaaneysaa dhibanayaasha in ay u sheegaan dambiilaha sida ay u saameysay, hadal ka jeediyaan oo sida loo xalin lahaa waxyeelada, oo ay bilaabaan in ay xaliyaan qaar ka mid ah saameynta dambiga. Kulan waxaa la yiraahdaa shirka cadaalada heshiisiinta.

**Dambiga halista ah**
- Dambiga dhaqanka galmada ama weerar kale oo halis ah.
- Dambiga sababay dhaawac halis ah ama dhimasho.
- Dambiga u hogaamiyay dhibanaha in uu lahaado cabsi joogta ah oo amnigooda ah ama amniga mid ama in kabadan oo xubnaha qoyskooda.

**La taliyaha dhibanaha xadgudubka galmada**
Xubinta shaqaalaha Wasaarada Cadaalada kaas oo u tababaran iyo waayo aragnimo ku leh xadgudubka galmada. Way sharaxi karaan iyaga nidaamka maxkamadda oo ay ku wargelin karaan dhibanayaasha horumarka dacwadooda.


**Diiwaanka wergalinta Dhibanaha**
Liiska qarsoodiga ah ee ay isticmaalaan hay'adaha cadaalada dambiga si loola socodsiiyo dhibanayaasha dambiilaha, sida meesha dacwada maxkamaddu ay mareyso, haddii ay jirto ka siideyn kumeel gaar ah oo xabsiga iyo marka dambiilaha lagu soo daayo cafis.

Ka diiwaangeli faahfaahintaada sarkaalka booliska oo masuul ka ah dacwada.

**Warbixinta saamaynta dhibanaha**
Diiwaanka sida dambigu uu usaameeyay dhibanaha. Warbixinta saameynta dhibanaha caadi ahaan waa qoraal, laakiin ku dar sawiro, qoraalo ama gabayo. Garsooraha waa in uu tixgeliyaa iyadda marka la xukumayo dambiile. Dhibanaha wuxuu ku akhrin karaa qoraalka maxkamadda ka hor inta aan la xukumin.

## Qolka maxkamadda

Jaantuskan wuxuu ku tusayaa hal tusaale oo ah qaabka qolka maxkamadda, iyo qofka aad arki karto.




1. **Garsooraha** ayaa masuul ka ah maxkamadda. Waxay go'aansadaan haddii dambiilaha uu dambi leeyahay, ama haddii ay jirto xeer beegti, xeer beegtiga ayaa go'aan ka gaaaryo midaan beddelkii.
2. **Diiwaan geliyuhu** wuxuu uu caawiyaa garsooraha iyo hubiyaa in nidaamyada maxkamadda la raacayo.
3. **Guddiga xeer beegtida** waxay ka koobanyihiin 12 qof oo go'aansado haddii eedeysanaha uu dambiila yahay.
4. **Dacwad oogaha** ayaa qaada dacwada isagoo matalaya Dacwad oogaha oo soo bandhiga dacwada ka soo horjeedo eedeysanaha.
5. **Warbaahinta** waa joornaaliistayaasha ka warbixiya dacwada.
6. **Qareenka eedeysanaha** wuxuu matalaaa eedeysanaha.
7. **Eedeysanaha** waa qofka lagu soo eedeeyay dambiga.
8. **Waardiyaha maxbuuska** wuxuu raacaa eedeysanaha.
9. **La taliyaha dhibanaha** xadgudubka galmada wuxuu ka caawiyaa markhaatiga fahamka nidaamka maxkamadda. Lagama yaabo in had iyo jeer ay joogaan qolka dhegaysiga dacwadaha.
10. **Markhaatiga qofka taageera** waa qofka uu garsoorahu ogolaaday in uu taageeri karo markhaatiga maxkamada.
11. **Markhaatiga** wuxuu bixiyaa caddayn ku saabsan waxa dhacay ama waxa ay ka ogyihiin dambiga.